confessióne s.f. - qirasho (da).
confezionare v.tr. - diyaarin, tolid.
confidare v.tr. e intr. - xog u sheegasho; ku kalsoonaansho.
confidènza s.f. - xog u sheegasho (da), ku kalsoonaan, kalsooni.
confinare v.intr. e tr. - soohdin la lahaansho; sohdimayn; masafarin.
confine s.m. - soohdin,xudduud.
confitto s.m. - iskahorimaad, dagaal.
confluire v.intr. - isku darmid (webi, dariiq).
confondere v.tr. - ku qaldamid.
confóndersi v.rifl. - wareerid.
conformismo s.m. - tala raacid (da).
confortare v.tr. - samirsiiн.
confortévole agg. - garawsiinyo. leh, raaxo leh.
confòrto s.m. - samarsiin (ta).
confrontare v.tr. - isbarbardhigid.
confrónto s.m. - isbarbardhigid (da).
confusióne s.f. - wareer, rabsho, buuq.
confuso agg. - wareersan, isku-buuqsan.
congedare v.tr. - ruqsayn.
congelare v.tr. - barafayn.
congettura s.f. - mala'awaal, male.
congiungere v.tr. - xiriirin, isugeyn.
congiuntivo s.m. - erey naxweed oo tilmaamaya nooc gooreyn.
congiuntura s.f. - xaalad.
congiunzione s.f. - xiriirin (ta) isugeyn (ta).
congiura s.f. - shirqool.
congiurare v.intr. - shirqoolid.
congratularsi v.rifl. - hambalyeyn, bogaadin.
congratulazione s.f. - hambalyo, bogaadin (ta).
congresso s.m. - shirweyne.
cònico agg. - qaab toobin leh.
coniglio s.m. - bakeyle.
coniugare v.tr. - rogrogid fal; isuguurin.
coniugato agg. - guursaday.
coniugazione s.f. - isrogrogid fal.
còniuge s.m. - sayga ama afada, labada isu dhaxda midkooda.
connazionale agg e s.m. - isku waddan ah.
connessione s.f. - isku xirid (da).
connéssø agg. - isku xiran.
connétttere v.tr. - isku xirid.
còno s.m. - toobin.
conoscènte s.m. - macruuf (qof).
conoscènza s.f. - aqoon, garasho-(da).
conoscere v.tr. - garasho; aqoon-sasho.
conquista s.f. - xoog ku qabasho (da).
conquistare v.tr. - xoog ku qabsasho.
consacrare v.tr. - waaq dhacin.
consacrazione s.f. - waaq dhac, allabari, waqlal.
consanguíneo agg. e s.m. - isir-wadaag (ah).
consapévole agg. ~ og, dareen-san.

consecutivo

- consecutivo** agg. - ku xiga.
- consérgna** s.f. - ku wareejin (ta), dhiibid (da).
- consegnare** v.tr. - guddoonsiin, ku wareejin.
- conseguènza** s.f. - cirib dambeed.
- conseguire** v.tr. - gaarid dan, he-lid.
- consénso** s.m. - oggolaansho (da).
- consentire** v.intr. e tr. - aqbalid, u oggolaansho.
- conservare** v.tr. - kaydin.
- conservativo** agg- muxaafid ah.
- conservatóre** agg. - muxaafid.
- conservazioné** s.f. - kaydin (ta), daryeel.
- considerare** v.tr. - tixgelin.
- considerarsi** v.rifl. - isuqabid.
- considerazioné** s.f. - tixgelin (ta), aabayeel.
- considerévole** agg - tixgeli leh, muhiim ah.
- consigliare** v.tr. - la talin.
- consigliére** s.m. - la taliye.
- consiglio** s.m. - talo; gole, guddi.
- consisténte** agg. - adag.
- consisténtza** s.f. - adkaan.
- consistere** v.intr. - ka koobnaansho.
- consolare** v.tr. - samarsiin.
- consolato** s.m. - qunsulyad.
- consolazióne** s.f. - samarsiin (ta).
- cònsole** s.m. - qunsui.
- consolidare** v.tr. - adkayn, urursanaan.
- consolidarsi** v.rifl. - adeeg no-qosho.
- consonante** s.f. - shibbane.
- consòrte** s.m. e f. - say ama afo.
- constatare** v.tr. - dareemid.
- constatazióné** s.f. - aragti.
- consuèto** agg. - caadi ah.
- consuetudine** s.f. - dhaqan, caado.
- consultare** v.tr. - la tashasho, la showrid.
- consultazioné** s.f. - la tashi.
- consumare** v.tr. - dhammayn, idlayn, isticmaalid.
- consumo** s.m. - idlayn (ta), istac-maal.
- contabile** agg - xisaabeed.
- contabile** s.m. - xisaabiye.
- contadino** s.m. - berrey.
- contagiare** v.tr. - jirro qabad-siin, ku daarašho jirro.
- contagiósø** agg. - lays qabadsiyo, isku daarsho leh.
- contaminare** v.tr. - sumayn, fad-darayn.
- contaminazioné** s.f. - sumayn (ja).
- contante** agg. - (lacag) naqqdi ah.
- contare** v.tr. - tirin, xisaabin.
- contatto** s.m. - istaabat; xiriir.
- contemplare** v.tr. - fiir fiirin.
- contemporaneo** agg. - isku waqtı, ja fil ah; iskumar (dhaca).
- contenére** v.tr. - kujirid, qaadid.
- contentare** v.tr. - maqsuudin, raa-lli gelin.
- contentarsi** v.rifl. - ku masquuidid.
- contènto** agg. - maqsuud ah, raalli ah.
- contenuto** s.m. - ku jire; duluc.
- contestare** v.tr. - caaridid, diidid.
- contestazioné** s.f. - caaridid (da).
- continénte** s.m. - qaarad.
- continuare** v.tr. - sii wadid.
- continuaménte** avv.- si joogta ah.

copiare

- continuazione** s.f. - sii wadidda.
continuo agg. - joogta ah.
conto s.m. - xisaab.
contórno s.m. khudrad cunto
lagu iidaamo.
contrabbandiére s.m. - qof koon-
torobaan ku shaqeeysta.
contrabbando s.m. - kotorobaan.
contraccambiare v.tr. - isdhaafsa-
sho, isweydaarsasho.
contraddiré v.tr. - isburin.
contraddizíone s.f. - isburin (ta).
contrappórre v.tr. - hordhigid.
contrario agg. - lid ah, ka soo hor-
jeedo.
contrastare v.tr. - khilaafid.
contrastó s.m. - iskahorimaasho-
(da), khilaaf.
contrattare v.tr. - gorgorin, baa-
yicid.
contratto s.m. - heshiis.
contravvenzioné s.f. - ganaax.
contrazíone s.f. - kaduudid (da),
qombobid (da).
contribuire v.intr. - ku tabarucid,
kaalin ka qaadasho.
contributo s.m. - tabarruc.
contro - pref. - hor kabe, tilmaa-
maya lid.
sóntro prep. - lid.
controllare v.tr. - kormeeriid,
ilaalin.
contróllo s.m. - kormeer, ilaalin-
(ta).
controspionàggio s.m. - urur si-
reed oo la dagaallama dhaq-
dhaqaqyada basaas ee
dawladaha kale.
controvérsia s.f. - muran.
controvérsio agg. - muran ku jira.
- conválida** s.f. - ansixin (ta).
convalidare v.tr. - ansixin.
convérgo s.m. - shir.
conveniente agg. - roon, hab-
boon.
convenire v.intr. - isku imaasho,
roonaansho.
convenzionale agg. - laysku raa-
cay, heshiis lagu ah; caadi ah.
convenzioné s.f. - heshiis, isku-
raacid (da).
convergènza s.f. - isugu imaasho-
(da).
convergere v.intr. - isugu imaa-
sho.
conversare v.intr. - haasaawid.
conversazióne s.f. - haasaw.
convertire v.tr. - caqilid beddelid,
beddelid.
convesso agg. - tuureed.
convincere v.tr. - ka dhaadhicin.
convinto agg. - ka dhaadhacsan.
convivènza s.f. - wada noolasho
(da).
convivere v.intr. - wada noolaa-
sho.
convocare v.tr. - shir isuguyeerid.
cooperare v.intr. - iskaashasho.
cooperativa s.f. - iskaashato.
cooperazíone s.f. - iskaashi.
coordinare v.tr. - habayn, isudu-
wid.
coordinatóre s.m. - isuduwe.
copérchio s.m. - dabool.
copèrta s.f. - buste.
copertina s.f. - jallaad, jildi.
coperto agg. - daboolan.
copertura s.f. - ded, dabool.
còpia s.f. - nuql.
copiare v.tr. - guurin.

copiatura

- copiatura** s.f. - guurin (ta).
- còppa** s.f - koob (ciyaareed).
- còppia** s.f - lammaan.
- coprifuóco** s.m. - bandow.
- coprire** v.tr. - daboolid, dedid.
- coràggio** s.m. - geesinnimo.
- coraggióso** agg. - geesi ah.
- corallo** s.m. - murjaan, shu-caabi.
- Corano** s.m. - Quraan.
- còrda** s.f - xarig.
- cordiale** agg. - diiran (salaan).
- coricare** v.tr. - seexin.
- coricarsi** v.rifl. - seexasho.
- cornice** s.f. - freem.
- còrno** s.m. - gees.
- còro** s.m. - jiib.
- coróna** s.f. - taaj.
- coronare** v.tr. - caleemasaarid.
- còrpo** s.m. - jir, kor; koox.
- corporatura** s.f. - muuqa korka, joog.
- corrèggere** v.tr. - sixid, toosin.
- correlazione** s.f. - xiriir.
- corrènte** agg. - socda (biyo, lacag, ra'yi, bil, sannad); (essere al c.: la socosho).
- corrènte** s.f. - socosho (da) (dabayl, biyo badeed, danab).
- còrrere** v.intr. - ordid, roorid.
- corrètto** agg. - quman, saxan.
- correttóre** s.m. - saxe.
- correzióne** s.f. - sixitaan.
- corridóio** s.m. - saabaad.
- corriéra** s.f. - bas, koryeeri.
- corrispondènte** agg. - waafaqsan, u dhigma.
- corrispondènza** s.f. - xiriir (waraa-qadeed).
- corrispóndere** v.intr. - waafaqsa-
- naa (sho), u dhlgmid.
- corrómpere** v.tr. - fadarayn, laa-luushid.
- corrótto** agg. - faddaraysan.
- corruzióne** s.f. - faddaro, laa-luush.
- córsa** s.f. - orod, tartan.
- còrso** s.m. - korso; tog.
- córte** s.f. - hoy boqoreed; (*fare la c.* : shukaansasho; *c. d'apello*: maxkamad racfaan).
- cortéccia** s.f. - jilif, qolof, dlub.
- corteggiare** v.tr. - xodxodasho, shukaansasho.
- cortèo** s.m. - damaashaad, gaardi.
- cortése** agg. - xushmad leh.
- cortesia** s.f. - (*per c.* : fadlan).
- cortile** s.m. - ardaa, barxad.
- córto** agg. - gaaban.
- còrvo** s.m. - tuke.
- còsa** s.f. - wax, shay.
- còscia** s.f. - bowdo.
- cosciénte** agg. - wax garad, miyir leh.
- cosciènza** s.f. - xis, miyir, damiir.
- così** avv. - sidaan, saas.
- cosicché** cong. - saas darteed.
- cosiddéttò** agg. - loo yaqaan.
- còsta** s.f. - xeeb.
- costante** agg. - joogto ah.
- costare** v.intr. - joogid (sicir).
- costata** s.f. - hilis feer leh, kostaa-to.
- costellazióne** s.f. - ururxiddigood.
- costituire** v.tr. - dhisid; ka koob-naansho.
- costituirsi** v. rifl. - isudhiibid shari, dembiqirasho.
- costituzióne** s.f. - dastuur.
- còsto** s.m. - sicir.
- còstola** s.f. - feer.

cugino

- costoso** agg. - qaali ah.
- costringere** v.tr. - qasbin, jajuu-bid.
- costruire** v.tr. - dhisid.
- costruttivo** agg. - dhiseed; waxtar leh.
- costruzione** s.f. - dhismo.
- costui** pron. - kan (qofka u dhow hadlaha).
- costume** s.m. - dhaqan; ma-tantaha qubayska.
- cotone** s.m. - cudbi.
- cotonificio** s.m. - warshad cudbi.
- cotto** agg. e s.m. - bisil, biseel.
- cottura** s.f. - bislayn (ta).
- cova** s.f. - cuq.
- covare** v. tr. - cuq fariisasho.
- covo** s.m. - god bahaleed, boo-raan.
- crânio** s.m. - lafmadaxeед.
- cratère** s.m. - buurta burkaanka afkeeda.
- cravatta** s.f. - qoorxir, garafaati.
- creare** v.tr. - uumid, abuurid.
- creato** s.m. - uun.
- creatôrê** s.m. - uume, Eebbe.
- creatura** s.f. - uun; ilmo ama qof weyn oo kalgacayl loo qabo.
- creazione** s.f. - uumid (da).
- credente** s.m. - mümin.
- credènza** s.f. - iimaan; caqido.
- crédere** v.tr. - rumayn, malayn.
- crédito** s.m. - amaaah.
- creditôrê** agg. - amaakiye.
- crème** s.f. - labeen, kreemo.
- crepare** v.intr. - dillaacmid, qar-xid; dhimasho.
- créscere** v.intr. - korid.
- créscola** s.f. - koritaan.
- cretino** agg. e s.m. - nacas (ah),
- dabbaal (ah).
- criminale** agg. e s.m. - dembiile, mujrim (ah).
- crimine** s.m. - dembi, jariimo.
- crisi** s.f. - dhibaato.
- cristallo** s.m. - wiriiq.
- cristiano** agg. - mislixi ah.
- Cristo** s.m. - nebi Ciise (diinta masiixi).
- critèrio** s.m. - hab wax lagu kala saaro, miqyaas.
- critica** s.f. - dood, muran, naqdin.
- criticare** v.tr. - naqdiyid.
- critico** agg. e s.m. - halis ah, adag.
- croce** s.f. - istallaab, macatab.
- crollare** v.intr. - dumid.
- cròllo** s.m. - dumid (da).
- crònaca** s.f. - qoraal wargeys oo ka hadlo dhacdooyinka baa-danaa maxalli ah.
- crónico** agg. - cudur raaga da-weyntiisuna adkaatay.
- cronômetro** s.m. - saacadda is-boortiga lagu kontroolo.
- crôsta** s.f. - qolof.
- cruciale** agg. - halis ah, adag.
- crudèle** agg. - naxariis daran.
- crudeltà** s.f. - naxariisdarro.
- crudo** agg. - ceerin ah, qeeriin ah.
- crusca** s.f. - buunsho.
- cubo** s.m. - saddex jibaar.
- cucchiaino** s.m. - qaaddo yar.
- cucchiàio** s.m. - qaaddo.
- cùcciololo** s.m. - dhallaan ey.
- cucina** s.f. - jiko.
- cucinare** v.tr. - karin.
- cucire** v.tr. - tolid.
- cùffia** s.f. - koofiyad ilaa dhegaha iyo qoorta gaarto.
- cugino** s.m. - ina adeer.

cui

cui pron. - kii, tii.
culta s.f. - sariir dhallaan.
cullare v.tr. - dhallaan ruxid.
cùlmìne s.m. - fiin, dhako.
culto s.m. - cibaado, qaddarin
weyn.
cultura s.f. - dhaqan, hijde.
culturale agg - dhaqameed.
cuòcere v.tr. - bislaysn.
cuòco s.m. - kariye, kooke.
cuòio s.m. - meged.
cuòre s.m. - wadne.
cùpola s.f. - qubbad.

cura s.f. - daweynta.
curare v.tr. - daweyn; baxnaanin.
curarsi v.rifl. - isbaxnaanin.
curiosità s.f. - wax ogaal jecel.
curioso agg. - qof jecel in uu
ogaado wax walba.
curva s.f. - qallooc, ieexad.
curvare v.tr. - qalloocin.
curvo agg. - qalloocan.
cuscino s.m. - barkin.
custòde s.m. - gaar haye.
custòdia s.f. - gaar hayn (ta).
custodire v.tr. - ilaalin, gaar hay-

D

da prep. - ka (*vengo da casa;*
gurigaan ka imid).

daccapo avv. - bilaabid, sadar
cusub billaabid.

dado s.m. - daado.

daltónico agg. e s.m. - qof iin
arag awgeed kala saari karin
midibyada guduudka iyo ca-
gaarka.

daltónismo s.m. - cudurka "dal-
tonico".

damigiana s.f. - dibijaan, fiyaaska
weyn.

dannato agg. - kadeedan, ca-
daaban.

dannazione s.f. - kadeed, cadaab.

danneggiare v.tr. - waxyeellayn.

danno s.m. - waxyeello.

dannoso agg. - waxyeello leh,
dhibaato keena.

danza s.f. - qoob ka cayaar.

danzare v.tr. - qoob ka cayaarid.

dappertutto avv. - meel walba,
meel kasta.

dapprima avv. - biliowga.

dare v.tr. - siin, dhiibid, bixin.

data s.f. - taariikh (maalin, bil,
sannad).

dato agg. e s.m. - mucayan, la
yaqaanno.

dàttero s.m. - timir.

dattilografare v.tr. - makiinad ku
qorid, ku garaacid.

dattilografo s.m. - makiinadga-
raace.

davanti avv. - hore, horay.

davvéro avv. - runti.

dèa s.f. - ilaahad.

debellare v.tr. - ciribtirid, dabar-
goyn, baabi'in.

debilitare v.tr. - taagdarraynsiin.

débito s.m. - dayn.

debitore s.m. - daynqabe.

débole agg. - nugul, taagdaran.

debolézza s.f. - nuglaan, taag-
darro.

dèca- pref. - hor kabe tilmaama
tiro tobani.

decadénte agg. - liicsan,dhici
raba.

decadére v.intr. - liidasho.

decàgono s.m. - tobangeesle.

decagrammo s.m. - tobani ga-
raamo.

decàlitro s.m. - tobani litir.

decàmetro s.m. - tobani mitir.

decapitare v. tr. - qurgoyn.

decèdere v.intr. - dhimasho.

decelerare v.tr. - xawli yarayn

decennale agg. - tobansanaale.

decènnio

decènnio s.m. - tobán sano gudahooda.

decènte agg. - hufan, sharaf leh.

decèssø s.m. - geeri, dhimasho.

déci pref. - horkabe tilmaama tobán meel meel.

decidere v.tr. - go'aangaarid, go'aamin.

decidersi v.rifl. - goosasho, go'aansasho.

decifrare v.tr. - garasho qoraal tiro ka kooban; garasho far adag ama si fiican aan u muuqanin.

decimare v.tr. - yarayn (tiro); baabi'in.

decimale agg. - jajabtobanie.

decimetro s.m. - desimitir.

décimo agg. - tobnaad.

decisivo agg. - kala bax.

decisióne ku s.f. go'aan.

decina s.f. - tobaneeyo.

deciso agg. - taagan, go'aansan.

declinare v.intr. - dhicid (qorrax).

declino s.m. - hoos u dhicid (da).

decollare v.intr. - dhul ka duulid dayaaraad.

decòllo s.m. - dhul ka duulid (da) (dayaaraad).

decolorante agg. e s.m. - tirtiri kara midibyada.

decolorare v.tr. - midib tirtirid.

decompórre v.tr. - kala buruburin, kala bixin.

decompórsi v.rifl. - qurmíid.

decomposizíone s.f. - kala burbur, kala bax.

decorare v.tr. - qurxin; ku sharfid billad ama wax u eg.

decorazíone s.f. - billad.

decoróso agg. - sharaf iyo xurmo leh.

decréto s.m. - go'aan dawladeed.

dedicare v.tr. isku howlid.

dedicarsi v.rifl. - u go'doomid.

dedurre v.tr. - ka garasho, ka goyn.

deficiénte s.m. - maangaab.

definire v.tr. - qeexid; xadeyn.

definitivo agg. - kama dambays ah.

definizióne s.f. - qeexid (da).

deformante agg. - qaab xun leh.

deformare v.tr. - qaab xumayn.

deformazíone s.f. - qaabdarran.

defórme agg. - xun, iin leh, qaab-darran.

defunto agg. e s.m. - marxuum.

degenerare v.intr. - sii baabi'id, sii xumaasho.

degenerato agg. - kharriban.

deglutire v.tr. - liqid, dhunjin.

degnare v.tr. - xushmayn.

degnarsi v.rifl. - u qalmid.

dégno agg. - u qalma, istaaħila.

degradare v.tr. - darajo ka jarid; liidid.

degradazióne s.f. - darajo ka jarid (da).

dèlega s.f. - wakiilasho (da), wakaalad.

delegare v.tr. - wakiilasho.

delegato agg. e s.m. - ergey, wakiil.

delegazióne s.f. - ergo, wafdi.

delfino s.m. - hobobboro.

deliberare v.tr. - go'aamin.

deliberazíone s.f. - go'aan.

delicatézza s.f. - jilicsanaan, xasaasinnimo, nuglaan.

descrivere

- delicato** v.tr. - jilicsan; xasaa-si ah.
- delimitare** v.tr. - xadeyn.
- delimitazione** s.f. - xadeyn (ta).
- delinquente** s.m. - mujrim.
- delinquenza** s.f. - mujrimnimo.
- delirio** s.m. - qaraw, calwasaad.
- delitto** s.m. - dembi, jarimo.
- delizioso** agg. - aad looga helo; dhadhan fiican.
- delta** s.m. - xarafka afaraad ee xuruufta afka giriigga: biyo shub webi oo ballaaran.
- deludere** v.tr. - qalbi jabin.
- delusione** s.f. - qalbi jab, niyad jab.
- demente** agg. - waallan.
- democratico** agg. - demoqraadhi ah.
- democrazia** s.f. - demoqraadiyad.
- demografia** s.f. - aqoon ku saabsan taranka iyo xaaladda dadweynaha.
- demolire** v.tr. - dumin, baabi'in.
- demonio** s.m. - jinni, shaydaan.
- demoralizzare** v.tr. - qalbi jabin, niyad jabin.
- denaro (o danaro)** s.m. - lacag.
- denominare** v.tr. - magac u bixin.
- denominatore** s.m. - hooseeye: tirada hoose ee jajabka.
- denotare** v.tr. - tilmaamid; sheegid.
- densità** s.f. - cufnaan.
- denso** agg. - cufan (wax culus oo mug yar).
- dentatura** s.f. - wadajirka ilkaha.
- dente** s.m. - itig.
- dentiera** s.f. - ilko aan dabiici ahayn.
- dentifricio** s.m. - wax ilkaha na-diifiya.
- dentista** s.m. - takhtarka ilkaha.
- dentro** avv. - gudaha.
- denudare** v.tr. - qaawin.
- denuncia** s.f. - dacwad.
- denunciare** v.tr. - dacweyn.
- denutrito** agg. - macluulsan.
- deodorante** agg. e s.m. - wax shiirkha baabi'ya.
- depennare** v.tr. - tirtirid, masaxid.
- deperfrire** v.intr. - sii xumaasho.
- deporre** v.tr. - dhigid, hub dhigid; markhaati kicid.
- deportare** v.tr. - masaafirin.
- depositare** v.tr. - dhigaalin; hoos u dhigid.
- depositarsi** v.rifl. - hoos u degid.
- deposito** s.m. - dhigaal, curaar; dhoobo.
- depositazione** s.f. - markhaati kicid (da); casilaad madax.
- depredare** v.tr. - dhacid, boobid, xoogid.
- depresso** agg. - madluunsan.
- deprimere** v.tr. - niyad jabin, liidid.
- depurare** v.tr. - sifayn.
- deputato** s.m. - xildhibaan, mudane.
- deridere** v.tr. - ku ciyaarid, ku kajimid.
- derivare** v.intr. - ka imaansho.
- dèrma** - pref. - hor kabe tilmaama harag.
- dermatologia** s.f. - cilmiga cudur-rada maqaarka.
- derubare** v.tr. - xadid.
- descrivere** v.tr. - sharrixid, sifayn.

descrizione

- descrizione** s.f. - sharrax, sifayn (ta).
- deserto** s.m. - lamaddegaan.
- desiderare** v.tr. - damcid, doonid, rabid.
- desiderio** s.m. - damac, doonis.
- designare** v.tr. - far ku fiqid, si fiican u tilmaamid; ugu talage-lid qof jago.
- desinenza** s.f. - ereyga dhammaadkiisa halkuu iska rogora.
- desolato** agg. - tiiraanyaysan, cida', waaqla'.
- destare** v.tr. - kicin, toosin; ku beerid.
- destinare** v.tr. - jahayn.
- destinazione** s.f. - meesha qof ama warqad iwm, ayu socdaan.
- destinatario** s.m. - qofka ama hay'adda lagu hagaajiyay (warqad iwm).
- destino** s.m. - aayo.
- dèstra** s.f. - midig.
- dèstro** agg. - midigeed.
- detenere** v.tr. - haysasho.
- detenuto** agg. e s.m. - garsuge.
- deteriorare** v.tr. - sii xumayn, sii baabi'in.
- deteriorarsi** v.rifl. - xumaansho, sii baabi'id.
- determinare** v.tr. - xaddidin, sugid; sababid.
- determinato** agg. - go'an, sugar.
- detersivo** agg. e s.m. - shay wax nadiifiya.
- detestare** v.tr. - nebcid, kahasho.
- detrito** s.m. - shalaw.
- dettagliato** agg. - tifaftiran.
- dettaglio** s.m. - tifaftir.
- dettare** v.tr. - yeerin; amrid.
- dettato** s.m. - yeeris.
- detto** agg. - lagu naanayso, xusan.
- detto** s.m. - oraah.
- devastare** v.tr. - kharraabin, baabil'in.
- deviare** v.tr. - leexin, weecin, duwid.
- devoto** agg. - daacad ah; u go-doomay.
- di** prep. - ee, ka; (*il libro di Ali*: buugga Cali; *il libro rosso di Ali*: buugga guduudan ee Cali; *di che cosa parli?* mahaad ka hadlaysaa?).
- di** s.m. - maalin.
- diabète** s.m. - kaadi sokrow.
- diaframma** s.m. - bog.
- diagnosi** s.f. - baaris cudureed.
- diagonale** agg. e s.m. - xagal goove.
- dialettale** agg. - af guriyeed, lah-jadeed.
- dialètto** s.m. - lahjad, af guri.
- dialogo** s.m. - haasaawe.
- diamante** s.m. - dheeman.
- diametro** s.m. - dhexroor.
- diario** s.m. - buug xusuus qor.
- diarrea** s.f. - shuban, ban.
- diavolo** s.m. - jinni, shaydaan.
- dibattito** s.m. - beanise, dood.
- diboscamento** s.m. - dhir jarid (da)
- diboscare** v.tr. - jarid dhir, geed qaadir.
- dicembre** s.m. - diseember.
- diceria** s.f. - ku tiri kuteen.
- dichiarare** v.tr. - caddayn.
- dichiararsi** v.rifl. - kalgacayl u

dinàmico

- muujin qof la jecelyahay.**
dichiariżone s.m. - caddayn.
diciottènne agg. e s.m. - siddeed
iyo toban jir.
didàttica s.f. - habka wax dhi-
gista.
diéci agg. - toban.
decina s.f. - tobaneeyo.
diéta s.f. - hab quudasho.
diétre avv. - gadaal, dib.
difendere v.tr. - daaficid.
difendersi v. rifl. - is daaficid.
difensore agg. e s.m. - daaface.
difesa s.f. - gaashaan dhig; difaac;
qareen.
difetto s.m. - iin, cillad.
difettoso agg. - iin leh.
diffamare v.tr. - dhaleeceen.
diffamazione s.f. - dhaleecayn
(ta).
differente agg. - ka duwan.
differenza s.f. - farqi.
differenziare v.tr. - kala duwid.
differenziarsi v.rifl. - iska soo-
cid, gooni iska dhigid.
differire v.tr. e intr. - dib u dhigid;
ka duuwanaansho.
difficile agg. - adag, qallafsan.
difficoltà s.f. - adkaan, qallaf-
sanaan, dhibaato.
diffidare v.intr. - ku kalsoonj-
la'aansho.
diffidente agg. - shaki badan,
aamin daran.
diffidenza s.f. - aamindarro.
diffondere v.tr. - faafin, baahin.
diffondersi v.rifl. - faafin, baa-
hid.
diffusione s.f. - faafis, faafin (ta).
diffuso agg. - faafsan, baahsan.
- diga** s.f. - biyo-xireen.
digerire v.tr. - dheefshiidiid.
digestione s.f. - dheefshiidiid.
digestivo agg. e s.m. - walxo
dheefshiidka fududeeya.
digitale agg. - raadka faraha.
digiuno agg. e s.m. - sooman;
soon.
dignità s.f. - sharaf, sumco.
dilagare v.intr. - ku fidid, ku
ballaarasho.
dilatare v.tr. - fidin, ballaarin.
dilatarsi v.rifl. - ballaarasho,
weynaansho.
dilatazione s.f. - ballaarin.
dilemma s.m. - laba daran mid
dooro.
dilettante s.m. - barbarad.
diletto agg. e s.m. - aad loo jec-
yahay; farxad.
diligente agg. - dadaal badan.
diluire v.tr. - barxid.
diluvio s.m. - duuifaan.
dimagrire v.intr. - caatoobid.
dimensione s.f. - baac.
dimenticare v.tr. e rifl. - illoobid,
illaawid.
dimettere v.tr. - ruqsayn; isbitaal,
ama xabsi ka saarid.
dimetttersi v.rifl. - is casiid.
diminuire v.tr. e intr. - yarayn, dhij-
mid; yaraansho.
dimissione s.f. - ruqso, iscasiliid.
dimora s.f. - hoy.
dimorare v.intr. - degid.
dimostrare v.tr. - muujin, tusid;
qeexid; bambixid.
dimostrazione s.f. - bannaanbax,
banbax; qeexid (da).
dinàmico agg. - firfircoon.

dynamite

dynamite s.f. - miino.

dynamo s.f. - diinamo.

dinanzi prep. - hor, hore.

dintorni s.m.pl - agagaar.

Dio s.m. - llaah, Eebbe.

dipartimento s.m. - waax.

dipendente agg. - ka tirsanaan, madax bannaanayn.

dipendere v.intr. - ka imaansho, ku xirnaansho, ka tirsanaansho.

dipingere v.tr. - aslid, rinjiyeyn.

diploma s.m. - shahaado.

diplomatico agg. - diblomaasi.

diplomazia s.f. - diblomasiyad.

diramare v.tr. - baahin, dirid.

dire vtr. - dhihid, sheegid.

direttamente avv. - dhawaali, si toos ah.

diritto agg. - ku jihaysan toosan, saani.

direttore s.m. - maamule, agasime.

direzione s.f. - jaho; agaasin, maamul.

dirigente agg. e s.m. - hoggaamiye.

dirigere v.tr. - hoggaamin maa-mulid, agaasimid.

dirigersi v.rifl. - u jeesasho, abbaarid.

diritto agg. - toosan; quman.

diritto s.m. - xuquuq, xaq.

dirottare v.tr. - afddubid (diyyarad).

dis-prefisso - horkabe muujinaya lid markab iwm.

disabilitato agg. - waaqla', cidla'.

disaccordo s.m. - heshiis la'aan.

disagiato agg. - rafaadsan.

disagio s.m. - rafaad.

disapprovare v.tr. - diidid, ee-dayn.

disarmare v.tr. - hub ka dhigid.

disarmato agg. - aan hub haysan.

disastro s.m. - hoog, belo.

disattento agg. - aan digtoonayn, maahsan.

disattenzione s.f. - feejignaan la'aan.

dissettivare v.tr. - ka hortegid qarax iwm.

disboscare v.tr. - dhir jarid.

descendente agg. e s.m. - farac.

descendenza s.f. - farac, isir.

discendere v.intr. - hoos u dhaadhid, ka soo tafirmid, ka imaansho.

discépolo s.m. - xer, arday.

discésa s.f. - degaandeg.

disciplina s.f. - xeer, disiblin; maaddo.

disciplinato agg. - edebsan, dhawrsan.

disco s.m. - saxan, sixni.

discolpare v.tr. - eed ka daaficid.

discolparsi v.rifl. - eed iska daaficid, eed iska reebid.

discontinuo agg. - aan taxane ahayn.

discòrdia s.f. - khilaaf, is afgaran-waa.

discórso s.m. - khudbad.

discoteca s.f. - diskoteek.

discrepanza s.f. - khilaaf, kala duwanaan.

discreto agg. - iska fiican.

discriminare v.tr. - takoorid, kala soocid.

discriminazione s.f. - midabta-

disposizione

- koorid**, kala sooc.
- discussióne** s.f. - dood, baanise.
- discútere** v.tr. - doodid, murmid.
- disdegnare** v.tr. - liidid, yasid.
- disdire** v.tr. - hadal ka noqosho, ballan ka bixid.
- disegnare** v.tr. - sawirid.
- disérgno** s.m. - sawir gacaneed; qorshe; ujeeddo.
- desertare** v.tr. - baxsasho.
- desertore** s.m. - askari baxsaday.
- disfare** v.tr. - kharribid, baabi'in.
- disgrázia** s.f. - ayaan darro, belo.
- disgraziato** agg. - ayaan darran, balaysan.
- disgregare** v.tr. - kala bixin, kala soocid.
- disgregarsi** v.rifl. - kala bixid, kala soocmid.
- disgregazíone** s.f. - kala bixid (da), kala soocmid (da).
- disguido** s.m. - khalad isafgaran-waa ka yimid.
- disgustare** v.tr. - yaqyaqsasho, kahasho.
- disgusto** s.m. - yaqyaqsi.
- disgustoso** agg. - laga yaqyaq-soodo.
- disimpégno** s.m. - ballan la'aan, hawlyaraysi.
- disinfettante** agg. e s.m. - jeer-mitire.
- disinfettare** v.tr. - culid, jeermittirid.
- disintegrare** v.tr. - burburin, kala bixin.
- disintegrarsi** v.rifl. - burburid.
- disinteressarsi** v.rifl. - ka xiisadhid.
- disintossicare** v.tr. - waabay ka saarid.
- disinvoltura** s.f. - isku kalsoo-naan.
- disinvólto** agg. - isku kalsoon.
- dislivèllo** s.m. - kala sarrayn, kala heer.
- dislocare** v.tr. - meel u guurin.
- disobbedire** v.tr. - amardiidid.
- disoccupato** agg. - shaqo la'.
- disonéstó** agg. - khaa'in.
- disonorare** v.tr. - sharaf jebin.
- disonorato** agg. - sharaf jabay.
- disonóre** s.m. - sharaf jab.
- disordinato** agg. - aan habays-nayn, kala daadsan.
- disórdine** s.m. - nidaam darro, nidaam xumo.
- disorganizzato** agg. - habays-nayn, nidaamsanayn.
- disorientare** v.tr. - jah wareerin, habaabbin.
- disorientato** agg. - jah wareersan.
- dispari** agg. - kisi (tiro).
- disperare** v.intr. - rajo beelid.
- disperarsi** v.rifl. - quusasho.
- disperato** agg. - rajo beelay, qalbi jabsan.
- disperazioñe** s.f. - rajadhigid (da), quus.
- dispérdere** v.tr. - firdhin, kala lumin.
- dispérso** agg. - firisan, lumay.
- dispétto** s.m. - kas, maag, ula kac.
- dispiacére** s.m. - xumaan.
- dispiacére** v.intr. - ka xumaansho.
- disponibile** agg. - diyaarsan, heegan, darban.
- dispórre** v.tr. - hagaajin, diyarin, habayn.
- disposizíone** s.f. - darbanaan, ammar u debecsanaan.

dispôsto

- dispôsto** agg. - diyaar, u debec-san.
- disprezzare** v.tr. - liidid, yasid, xaqirid.
- disprèzzo** s.m. - liidid(da), yasid-(da), xaqirid (da).
- disputa** s.f. - dood, muran.
- disputare** v.intr. - doodid, murmid.
- dissanguato** agg. - dhiig baxay.
- disseccare** v.tr. - qallajin, engejin.
- disseminare** v.tr. - faafin, firdhin.
- dissenteria** s.f. - dabadhiig, shuban.
- dissetare** v.tr. - oontirid.
- dissetarsi** v.rifl. - haraad beelid, oonbeelid.
- dissipare** v.tr. - lumin, siiba hanti iyo wim.
- discòlvere** v.tr. - kala bixin; dhalaalin, firdhin.
- dissuadere** v.tr. - ka waanin.
- distaccare** v.tr. - fujin.
- distacco** s.m. - kala tag, kala durug.
- distante** agg. - fog.
- distanza** s.f. - masaaf.
- distare** v.intr. - u jirid (meel).
- distendere** v.tr. - dheerayn, fidin; dejin.
- distendersi** v.rifl. - fidid, degid.
- distillare** v.tr. - xareedayn.
- distinguere** v.tr. - soocid.
- distinguersi** v.rifl. - iska soocid.
- distintivo** agg. e s.m. - calaamad aqconsi, summad.
- distinto** agg. - soocan, xulan.
- distinzione** s.f. - kala soocid (da), tixgelin (ta).
- distrarre** v.tr. - foojignaan wee-
- cin.
- distrarsi** v.rifl. - maahsanaanshc.
- distratto** agg. - maahsan.
- distrazioñe** s.f. - maahsanaan (ta)
- distréttó** s.m. - degmo.
- distribuire** v.tr. - u qeybin.
- distributóre** s.m. - qaybiye, makilnadda bansiinka qaybisa
- distribuziόne** s.f. - qaybin (ta).
- distruggere** v.tr. - dumin, baabin.
- distruziόne** s.f. - baaba', baabi'id (da).
- disturbare** v.tr. - rabshayn, arbushid.
- disturbarsi** v.rifl. - is rabshayn, isdhibid, isku buuqid.
- disturbo** s.m. - rabsho, dhib, buuq.
- disubbidire** v.intr. - amar diidid.
- disumano** agg. - bin'aadarimo ka baxsan.
- dito** s.m. - far.
- ditta** s.f. - shirkad ganacsi.
- dittatóre** s.m. - keligii taliye.
- dittatura** s.f. - keli talin(ta).
- diurètico** agg. e s.m. - kaadi badiye.
- diurno** agg. - maalmeed.
- diva** s.f. - xiddig (qof).
- divano** s.m. - kursi raaxo oo dhawr qof ku fadhiisato.
- divenire** v.intr. - noqosho.
- diventare** v.intr. - noqosho.
- divergènte** agg. - kala jeeda, kala fog.
- divergènza** s.f. - kala jeed, kala duwanaan.
- diversaménte** avv. - si ka duwan.
- diversità** s.f. - kala duwanaan.
- diverso** agg. - duwan.

divertente agg. - lagu raaxaysto, tumasho leh.	dolére v.intr. - xanuunid.
divertimento s.m. - tumasho raaxaysi.	dóllaro s.m. - doolar.
divertire v.tr. - raaxayn.	dolóre s.m. - xanuun.
divertiñsi v.rifl. - tumasho, raaxaysi.	doloroso agg. - xanuun leh.
dividere v.tr. - qaybin.	domanda s.f. - weyddiin(ta); arji.
dividersi v.rifl. - isqaybin.	domandare v.tr. - weyddiin, su'-aalid.
diviéto s.m. - mammuuc.	domani avv. - berri, berrito.
divinità s.f. - ilaahnimo.	domare v.tr. - carbin, layliyid, u talin.
divino agg. - ilaahiyed.	domattina avv. - berri subax.
divisa s.f. - isku joog, labis isku mid ah iwm.	doménica s.f. - axad.
divisibile agg. - la qaybin karo.	domèstico agg. - guriyeed; xoo-laha dadka la dhaqmo.
divisióne s.f. - qaybin (ta); gaas (ciidan).	domiciliato agg. - deggan.
divisióne s.m. - qaybshe, qaybiye.	domicilio s.m. - hoy.
divorcare v.tr. - cunto boobid.	dominare v.tr. - gumaysasho, u talin.
divorziare v.intr. - kala tegid; furid.	dominio s.m. - talis, gumeysi.
divorziato agg. e s.m. - garoob.	donare v.tr. - hibeyn, ku deeqid.
divòrzio s.m. - furriin.	dónde avv. - xaggee.
divulgare v.tr. - faafin.	dendolare v.tr. - ruxruxid.
dizionario s.m. - qaamuus.	dónna s.f. - naag.
dóccia s.f. - (fare la d.:qubaysasho).	donnaiòlo s.m. - nin naago wad badan.
docènte agg. - bare.	dóno s.m. - deeq, hibo.
dòcile agg. - hayin.	dòpo avv. - kaddib, dabadeed.
documentário agg. - dokomen-tari.	dopodomani avv. - saaddambe.
documento s.m. - dokumento, qoraal xoogwarran.	dóppio agg. - laba laab, laba jibbaar.
dódici agg. - tobani iyo labo, laba iyo tobani.	dorato agg. - dahabi.
dogana s.f. - dekad, furdo.	dormiglione s.m. - hurdaaye, hurdo weyne.
dólce agg. - macaan ah.	dormire v.intr. - seexasho, gam'id.
dolcézza s.f. ~ macaan.	dormitório s.m. - qol weyn oo dad badan wada seexda sida kul-lejooyinka.
dolciume s.m. - macmacaan.	dórso s.m. - duud, dhabar.
dolènte agg. - xanuunsan.	dosàggio s.m. - cabbir.
	dose s.f. - qiyas, cabbir (daawo).

dòsse

dòsse s.m. - duud, dhabar.

dotato agg. - leh, qaba.

dôte s.f. - dhibaad, meher; tayo
fiican (qof).

dottóre s.m. - jaamici, dhakhtar.

dottrina s.f. - (mad'hab).

dóve avv. - meeshee, xaggee.

dovére s.m. - waajib.

dovére v.intr. - ku waajibid.

dovùnque avv. - meet kasta, meal
walba.

dozzina s.f. - darsan.

dramma s.m. - masraxiyad.

drammàtico agg. - aan xasillayn,
qasan.

dròga s.f. - doroogo, mukhadda-
raad.

drogare v.tr. - doroogaysiin.

dromedàrio s.m. - geel (kan

kuruska keliya leh).

dùbbio s.m. - shaki.

dubitare v.intr. - shakiyid.

due agg. - labo.

duèlio s.m. - dagaal laba qof
isaga hor yimaadaan.

duna s.f. - bacaad.

dùnque cong. - haddaba, marka.

duo dèno s.m. - qayb xiidmaha ka
mjd ah.

duplicare v.tr. - badin.

dura s.f. - haruur, meseggo

durante prep. - intii (waqt).

durare v.intr. - raagid.

durata s.f. - waaris; waqtiga
uu shay soconayo.

durézza s.f. - adayg.

duro agg. - adag.

dùttile agg. - miiqma.

E

e cong. - iyo, -na.
ebbène cong. - haddaba.
ebrèo s.m. - yuhuud.
eccedenza s.f. - dheeraad, haraa.
eccellente agg. - aad u wanaagsan.
eccezzenza s.f. - mudane; wanaagsanaan.
eccessivo agg. - saayid ah, dheeraad ah.
eccesso s.m. - saayid.
eccetera (ecc. o etc.) - iyo wax la mid ah (iwm).
eccetto prep. - mooyaane, mooye.
eccettuare v.tr. - ka saarid, ka bixin.
eccezionale agg. - aan caadi ahayn.
eccezione s.f. - ka saarid(da), ka reebid(da).
eccidio s.m. - layn, baabi'in.
eccitante agg. - kiciyaha da-reenka.
eccitare v.tr. - dareen kicin.
ècco avv. - waa kan, waa tan.
eclisse (*eclissi*) s.f. - madoobaad (e. *lunare*: dayaxmadoo-saad; e. *solare*: qorrax

madoobaad).
èco s.f. - isu-yeed, codka soo noqda.
ecologia s.f. - degaan barasho, is-saamaynta nafleeda iyo degaanka.
economia s.f. - dhaqaale.
económico agg. - jaban, riqiis.
economista s.m. - dhaqaaleya-han.
ed cong. - iyo, (waxaan la istic-maalaa marka uu magaca ka dambeeyaa ku bilaabmo shaqal).
èdema s.m. - barar.
edificare v.tr. - dhisid.
edificazione s.f. - dhismo.
edificio s.m. - daar, sar.
edilizia s.f. - farsamada dhismaha.
editore s.m. e agg. - madaxa qoraalka.
edizione s.f. - nuskho.
educare v.tr. - barbaarin, rab-bayn.
educato agg. - edebsan.
educatore s.m. - barbaariye.
educazione s.f. - barbaarin(ta), waxbarasho(da); anshax, edeb.
effettivo agg. - rasmi ah.

effetto

effetto s.m. - saamayn(ta), raad.
effettuare v.tr. - samayn; fulin.
efficace agg. - wax tar leh.
efficiente agg. - karti leh.
efficienza s.f. - karti.
effimero agg. - aan raagayn.
ègira s.f. - hijiro (bilowga taarikhda islaamka).
égli pron. - isaga
egoismo s.m. - anaaniyo.
egoista s.m. - anaani.
eguale agg. - siman, la mid ah.
elaborare v.tr. - iskudubbaridid, samayn, hagaajin.
elastico agg. e s.m. - jiidma, kala baxa; laastico.
elefante s.m. - marootti.
elegante agg. - xarragaysan (mardaadi).
eleganza s.f. - xarrago, mardaadi.
elèggere v.tr. - doorasho.
elementare agg. - sahlan; scuola e.: dugsi hoose.
elemento s.m. - curiye, cunsur.
elemòsina s.f. - sadaqo, yabooh.
elemosinare v.intr. - yabooh-sasho, tuuksasho, dawarsasho.
elencare v.tr. - taxid.
elenco s.m. - liis.
elettorale agg. - ku saabsan codbixin.
elettricista s.m. - koronto-yaqaan.
elettore s.m. - codbixiye.
elettricità s.f. - koronto, danab.
elètrico agg. - korontaysan, danabaysan.
elettrizzare v.tr. - danabayn.

elevare v.tr. - kor u qaadid, kor u dhigid.
elezione s.f. - doorasho(da), codbixinta(ta).
èlica s.f. - marwaxad, rafaasad.
elicòttero s.m. - elikoter, da-yuuradda qumaatiga u kacda.
eliminare v.tr. - ka saarid, dilid.
eliminazione s.f. - saarid(da), dilid(da).
élmo s.m. - koofiyad bir ah.
élla pron. - iyada.
elogiare v.tr. - ammaanid, faanin.
elògio s.m. - ammaan.
eloquènie agg. - aftahan, fastiix.
eloquènza s.f. - aftahamo.
emanare v.tr. - soo saarid (sharci, iftiin, udug); faafin.
emanazionè s.f. - soo saarid(da), faafin(ta).
emancipare v.tr. - xorrayn.
emanciparsi v.rifl. - xuroobid.
emancipazióne s.f. - xorrayn(ta).
embargo s.m. - cunaqabateen.
emblème s.m. - astaan, summac.
embriónè s.m. - uurjiif.
embriologia s.f. - embrioloji.
emergènza s.f. - amar, xukun, gargaar deg deg ah.
emèrgere v.intr. - soo muuqasho, ka soo bixid, foocid.
emettere v.tr. - soo saarid (dhawaaq, qiiq).
emigrare v.intr. - dalabid.
emigrazióne s.f. - geeddi, socdaal.
emigrato agg. - qof daalkiisa ka dalaabay.

- emisfèro** s.m. - bardhul.
- emorragia** s.f. - dhiig bax.
- emorròidi** s.f.pl. - bawaasiir.
- emozionarsi** v.rifl. - laabkicid, niyadkicid.
- emozióne** s.f. - niyadkac, shucuur.
- energia** s.f. - xoog, tamar.
- enigma** s.m. - xaalad aan lagaran karin.
- ennésimo** agg. - dhowr jeer (badan).
- enòrme** agg. - baaxad leh, weyn.
- ènte** s.m. - wakaalad.
- entrambi** pron. - labadada.
- entrare** v.intr. - gelid.
- entrafa** s.f. - gelitaan, dakhli.
- éntro** prep. - dhexe, gude.
- entusiasmo** s.m. - xamaasad, xiiso.
- epidemia** s.f. - safmar.
- enunciare** v.tr. - sheegid
- epidèrmide** s.f. - maqaarka sare ee jirka, dubka sare.
- epilessia** s.f. - qallal.
- episòdio** s.m. - dhacdo (qayb).
- època** s.f. - waa', saman.
- èppure** cong. - haddana, si-daa ay tahay, misna.
- equatòre** s.m. - dhulbare, dhulsoore.
- equatoriale** agg. - dhulbareed.
- equazióne** s.f. - isle'eg (xisaab).
- equilibrio** s.m. - dheellitir.
- equipàggio** s.m. - shaqaalah maraakilbta ama dayuuradaha.
- equiparare** v.tr. - simid.
- equità** s.f. - caddaalad, sinnaan.
- équivalente** agg. - u dhigma.
- equivoco** agg. - ismaandhaafid(da), shaki leh.
- èra** s.f. - waa', saman.
- èrba** s.f. - caws.
- erbivoro** agg. - daaqe (caws).
- erède** s.m. - dhaxle.
- eredita'** s.f. - dhaxal.
- ereditare** v.tr. - dhaxlid.
- erigere (o èrgere)** v.tr. - taagid, dhisid.
- eròe** s.m. - geesi.
- erogare** v.tr. - siin, qaybin (gaas, biyo, if, koronto).
- eroina** s.f. - geesiyad.
- eroismo** s.m. - geesinnimo.
- eròtico** agg. - la xeriira wasmo.
- errare** v.intr. - warwareegid, meermeerid; geflid.
- erròre** s.m. - gaf, qalad.
- eruziòne** s.f. - daaco dhu-leed.
- esagerare** v.tr. e intr.- xad dhaafid, ka badbadin.
- esagerato** agg. - laga badba-diyey.
- esàgono** s.m. - lix geesle.
- esame** s.m. - imtixaan.
- esaminare** v.tr. - imtixaanid.
- esasperare** v.tr. - ka caray-siin.
- esattaménte** avv. - si sax ah.
- esatto** agg. - - sax ah, quman.
- esaurire** v.tr. - dhammayn.
- esaurirsi** v.rifl. - dhammaansho.

éscā

éscā s.f. - lacaaf.
esclamazióne s.f. - yaab,
 tacajub.
esclüdere v.tr. - ka saarid,
 ka reebid.
escremén̄to s.m. - saxaro,
 saalo.
esecuзиóne s.f. - fulin(ta).
eseguire v.tr. - fulin raa-
 cid, samayn.
esémpio s.m. - tusaale.
esemplificare v.tr. - tusaale
 ku sharxid.
esemplare agg. e. s.m. - tusaale
 loo qaadan karo; namuudaj.
esercitare v.tr. - ḥayliyid;
 hawl qabasho.
esercitazione s.f. - tababar,
 layli.
esèrcito s.m. - xoog, ciidan.
esercizio s.m. - layli.
esibire v.tr. - bandhi-
 gid.
esigéñza s.f. - baahi.
esíguo agg. - yar, dhuuban,
 miiqan.
esiliare v.tr. - musaafirin.
esilio s.m. - dal ka musaa-
 furid (siyaasad awgeed).
esistènza s.f. - jiritaan.
esistere v.intr. - jirid.
esitare v.intr. - shakiyid.
esitazióne s.f. - laba-laabo,
 taradud.
èsito s.m. - go'aan, natijjo.
esòfago s.m. - cune.
esortare v.tr. - guubaabin,
 ku boorin.
esòtico agg. - qalaadeed.
espàndere v.tr. - fidin, bal-

laarin.
espàndersi v.rifl. - fidid.
espansióne s.f. - fiditaan,
 fidid(da).
espèllere v.tr. - eryid, cayrin.
esperién̄za s.f. - waayoarag-
 nimo.
esperimento s.m. - tijaabo.
espèrto agg. e s.m. - khibrad
 leh; khabir.
espettorare v.tr. - tufid.
esplicito agg. - qeexan, cad.
esplódere v.intr. e tr. - qar-
 xid; qarxin.
esplorare v.tr. - sahmin.
esploratóre s.m. - sah-
 miye.
esplorazióne s.f. - sah-
 minta.
esplosióne s.f. - qarax.
espórrre v.tr. - sheegid; ban-
 dhig.
esposizióne s.f. - ban-
 dhigid.
esportare v.tr. - dhoofin.
esportatóre agg. e s.m.
 - dhoofiye.
esportazióne s.f. - dhoo-
 fin(ta).
espressiόne s.f. - tibaax,
 tiraab.
esprèssø agg. - qeexan;
 deg-deg ah.
esprimere v.tr. - dhigid,
 sharxid.
espulsiόne s.f. - eryid(da),
 raacdbyn(ta), cayrin(ta).
éssa pron. - iyada.
essenziiale agg. - muhimsan.
esso pron. - isaga (wax nool

- iyo waxaan noolayn).
- essere** v.intr. - ahaansho.
- essere** s.m. - jire, noole.
- essiccare** v.tr. - qallajin.
- est** s.m. - bari.
- estate** s.f. - xilliga kuleelaha (juun - sebtember).
- estendere** v.tr. - ballaarin, kordhin, badin.
- estensione** s.f. - ballac, fid-sanaan.
- esterno** agg. - dibadeed.
- estero** agg. - dibadeed, shisheeye ah; (*all'e*: khaarij, dibad).
- esteso** agg. - fidsan, bal-laaran.
- estinguere** v.tr. - suulin.
- estinguersi** v. rifl - suulid, salguurid.
- estinto** agg. - salguuray.
- estinzione** s.f. - salguur
- estirpare** v.tr. - ciribtirid.
- estivo** agg. - la xariira xilliga kuleelaha.
- estorcere** v.tr. - xoogid.
- estraneo** agg. e s.m. - ka baxsan; shisheeye.
- estrarre** v.tr. - soo saarid, siibid, bixin.
- estrazione** s.f. - soo saa-rid(da).
- estremo** agg. - ugudambee-ya, ugu geeseeyaa.
- eta'** s.f. - fil, cimri, da'.
- eterno** agg. - waara.
- etero** pref. - horkaba til-
- maama kala duwanaansho.
- eterogeneo** agg. - kala abuur ah.
- etimologia** s.f. - cilmiga baara isirkä ereyada.
- ettaro** s.m. - hektar.
- etto** (*ettogrammo*) s.m. - boqol garaammo.
- ettolitro** s.m. - boqol litir.
- ettometro** s.m. - boqol mitir.
- evadere** v.intr. - baxsa-sho, fakasho(xabsi iwm).
- evaporare** v.intr.-uumibixid, oomaarid.
- evaporazione** s.f. - uumibi-xid(da).
- evento** s.m. - dhacdo.
- eventuale** agg. - lacailla.
- evidente** agg. - cad, qexan.
- evidentemente** avv. - si cad-daan ah.
- evitare** v.tr. - reebid, ka leexasho.
- evoluzione** s.f. - tadhawur.
- evolvere** v.tr. - taddawurin.
- evolversi** v.rifl - taddawurid.
- ex - pref.** - horkabe tilmaama hore (*ex presidente*: madaxweynihii hore).
- extra** - pref. - horkabe tilmaama ka baxsan, dheeraad.
- extra** agg. e s.m. - ugu wanaag-san, caadi ahayn, loogu tala gelin.
- extraterrèstre** agg. - wax jira ama ku nool dhulka dibad-diisa.

F

fa avv. - lga joogo (waqt).

fabbisórgno s.m. - baahi.

fábrica s.f. - sanco, rug sanco.

fabricare v.tr. - sancayn, dhisid.

fabbro s.m. - birtume, tumaal.

faccénda s.f. - arrin.

facchino s.m. - xammaali.

faccia s.f. - fool, weji.

facciata s.f. - waajahadda guriga; baal (xaashi).

facile agg. - sahlan, fudud.

facilita' s.f. - sahlanaan.

facilitare v.tr. - fududayn, sahlin.

facilitázione s.f. - fududayn (ta).

facilménte avv. - si fudud ama sahlan.

facocéro s.m. - doofaar, doonfaar.

facolta' s.f. - karti; kulliyad.

facoltativo agg. - istikhyaar.

fagiòlo s.m. - digir.

fagocitare v.tr. - liqid.

falce s.f. - middi soo godan, minjal.

falciare v.tr. - shafid, gurid.

falco s.m. - gallayr.

falegname s.m. - najaar, fara-

yaamo.

falliménto s.m. - fashilmid(da).

fallire v.intr. - fashilid, gafid.

fallito agg. - fashalmay; kacay.

fallo s.m. - gaf, gus.

falsário s.m. - been qoraal abuure (dokumento, lacag, tikid iwm.).

falsificare v.tr. - been qoraal abuurid.

falsificatòre s.m. - been abuure.

falso agg. - been, dhalanteed.

fama s.f. - caan, magac dheer.

fame s.f. - gaajo, baahi.

famiglia s.f. - xaas, qoys, reer.

familiare agg. - qoyseed; siflican loo yaqaan.

familiare s.m. - xubin ka tirsan qoyska.

famóso agg. - caan.

fanale s.m. - nal weyn sida kan baabuurta.

fanàlico agg. e s.m. - mitid, seeflabood.

fanatismo s.m. - mitidnimo, seeflaboodnimo.

fanciulla s.f. - gabar.

fanciullo s.m. - wii.

fango s.m. - dhoobo.

fannullone s.m. - seeg-seeg.
fantasia s.f. - hindiso,khiyal.
fantasma s.m. - reer aakharo.
fantasticare v.intr. - hindisid.
fantastico agg. - layaab leh;
 wax kхиyaali ah.
fanteria s.f. - ciidan lug.
fantoccio s.m. - maqaarsaar.
farabutto s.m. - dhagarro.
faraóne s.m. - fircoon.
fare v.tr. - yeelid, samayn.
farsi v.rifl. - noqosho, iska
 yeelid.
farfalla s.f. - balanbaalis.
farina s.f. - bur.
farmacèutico agg. - ku shaqa
 leh dawo.
farmacia s.f. - farmashiyo.
farmacista s.m. - dawo gade
 ama diyaariye.
farmaco s.m. - dawo.
farmacologia s.f. - cilmiga
 dawada.
faro s.m. - munaarad.
fascia s.f. - faasho, gaarso.
fasciare v.tr. - duubid.
fascicolo s.m. - gal.
fascino s.m. - jinni, qof soo
 jiidasho leh.
fascio s.m. - xirmo.
fascismo s.m. - fashismo.
fascista agg. e s.m. - fashiste.
fastidio s.m. - rabsho, arbush.
fastidioso agg. - rabash badan.
fasullo agg. - been, hadoof.
fatale agg. - geeri leh; aan loo
 adkaysan karin.
fatica s.f. - dhib, shiddo.
faticare v.intr. - dhibaatoobid.
faticoso agg. - dhib leh.

fato s.m. - aayatiin, aayo.
fattibile agg. - la sameyn karo.
fatto s.m. - fal, arrin; xaqiq;
 dhacdo.
fattore s.m. - fale, xubin.
fattoria s.f. - beer, asendo.
fattorino s.m. - adeege boos-
 te.
fattura s.f. - qaansheegto.
fàuna s.f. - xoolo, xayawaan.
favo s.m. - kabar shinni,
 xabag barsho.
favola s.f. - sheekaxa-
 riir, sheekabaraaley.
favoloso agg. - la yaab leh.
favore s.m. - abaal, ixsaan.
favoreggiaménto s.m. -
 eexasho(da), hil.
favorévole agg. - taageer-
 san.
favorire v.tr. - taageerid,
 oggolaasho.
favorito agg. e s.m. - loogu
 jecelyahay.
fazzoléttò s.m. - fasaleeti,
 masar.
febbraio s.m. - febbraayo.
febbre s.f. - qandho, xumad.
feci s.f.pl. - saxaro.
fecondere v.tr. - bacrimin.
fecondo agg. - wax dhali kar-
 ta (nafley dheddig).
féde s.f. - iimaan, caqido.
fedèle agg. - daacad, mukhlis.
fedelta' s.f. - daacadnimo.
federale agg. - federaali.
federazione s.f. - qurumo mi-
 doobay, kooxo midoobay.
fégato s.m. - beer.
felice agg. - faraxsan.

felicità

felicità s.f. - farxad.

felino agg. e s.m. - la xariira bisad; qayb naaslay oo hilib cun ah (libaax, bisad, iwm.).

féminina s.f. - dheddig.

femminile agg. ~ dheddigeed.

femminilità s.f. - dheddignimo.

femminismo s.m. - urur ha-ween oo u dooda xuquuq dumar.

femminista s.m. e f. - qof raacsan *femminismo*.

fenditura s.f. - tarrar, qaraar.

fenicottero s.m. - cantalaa.

fenomeno s.m. - ifafaalo.

ferie s.f. pl. - maalmaha fasaxa.

feriale agg. - maalin shago.

ferire v.tr. - dhaawacid.

ferita s.f. - dhaawac.

ferito agg. - dhaawacan.

fermaglio s.m. - wax laboshey isku qabto sida biinka..

fermare v.tr. - joojin.

fermarsi v.rifl. - joogsasho.

fermata s.f. - hakad (gawaari).

fermentare v.intr. e tr. - khamiirid; khamiirin.

fermentato agg. - khamiirsan.

fermentazione s.f. - khamiir.

fermézza s.f. - ku adkaysasho-(da).

fermo agg. - taagan.

feroce agg. - bahal ah, dugaag ah.

ferro s.m. - bir.

ferrovia s.f. - jid tariin.

fervóre s.m. - shucuur aad u qoddo dheer.

fertile agg. - bacrin ah, dal

carrasan.

fertilizzante agg. - bacrimiye.

fertilizzare v.tr. - bacrimin.

féssø agg. - doqon, dabbaal.

fessura s.f. - dalool yar, tarrar.

festa s.f. - iid, damaashaad.

festeggiare v.tr. - dabbaaldegid, iiideysasho.

féto s.m. - uurjiif.

fetta s.f. - jeex.

fiaba s.f. - sheeko baraaley.

fiacca s.f. - daal.

fiaccare v.tr. - daalin, lacii-fin, dacilifin.

fiacco agg. - nugul, dacilif.

flamma s.f. - olol, holac.

flammifero s.m. - tarraq, kibriid.

fianco s.m. - dhinac.

flasco s.m. - fiyaasko.

fiato s.m. - neef, adkeysi.

fibbia s.f. - birta suunka i.w.m.

fibra s.f. - miiq.

ficcanaso s.m. - faduuli.

ficcare v.tr. - xoog ku gelin, gelin.

ficcarsi v.rifl. - dhaxgelid.

fidanzarsi v.rifl. - ka bállan qaadid guur.

fidanzato s.m. - alkun.

fidarsi v.rifl. - aaminid, ku kalsoonaasho.

fidato agg. - aamin ah, lagu kaalsoon.

fiducia s.f. - ƙalsoonni.

fiéra s.f. - carwo.

fiéro agg. - islaqabweyn, naxariis daran.

fifa s.f. - baqdin, cabsi.

figóne s.m. - fulay.

fiume

- figliare** v. tr. - dhalid, (gaar ahaan xayawaanka).
- figlio** s.m. - cunug(ga), will.
- figliòlo** s.m. - maandhow.
- figura** s.f. - muuqaal, sawir, shaxan, jaantus.
- figurare** v.tr. - sawirid; u malayn.
- figurativo** agg. - sawir ku muujisan.
- figurato** agg. - shaxan leh, afka maldahan, sarbeeban.
- fila** s.f. - saf.
- filaménto** s.m. - miiq.
- filare** v.tr. e v.intr. - miiqid; si deg deg ah hor u socosho.
- filiale** s.f. - laan, farac.
- film** s.m. - filin.
- filmare** v.tr. - filin qaadid.
- filo** s.m. - dun, filo.
- filologia** s.f. - cilmiga afafka iyo suugaanta.
- filosofia** s.f. - falsafad.
- filòsofo** s.m. - faylasuuf.
- filtrare** v.tr. - miliqid.
- filtro** s.m. - miire.
- finale** agg. - gabaggabo, dhammaad.
- finalménte** avv. - ugu dambaynti.
- finanza** s.f. - maaliyad.
- finanziaménto** s.m. - maal-gelin(ta).
- finanziare** v.tr. - maalgelin.
- finche'** cong. - ilaa, intii.
- fine** agg. - dhuuban, fiioan.
- fine** s.f. - dhammaad.
- fine** s.m. dan.
- finèstra** s.f. - dariishad.
- finézza** s.f. - habsami, wanaag.
- fingerere** v.tr. - iska dhigid.
- ingersi** v.rifl. - isyeelyeelid.
- finire** v.tr. - dhammadyn..
- finito** agg. - dhammaday.
- fino** prep. - ilaa, tan iyo.
- finóra** avv. - ilaa haatan, welli.
- finta** s.f. - isyeelyeel, iska dhigid(da).
- finto** agg. - dhalanteed ah, dabiici ahayn.
- fiónda** s.f. - waraf.
- fioràio** s.m. - ubax iibiyé.
- fiòre** s.m. - ubax, fiid.
- fiorènte** agg. - barwaqaqaysan.
- fiorire** v.intr. - ubaxaysasho, ubaxoobid.
- fioritura** s.f. - uboxoobid(da), xilliga ay dhirtu ubaxaysato.
- firma** s.f. - saxiix.
- firmare** v.tr. - saxiixid.
- firmatário** s.m. - saxiixe.
- fischiare** v.intr. - foorin, flijis.
- fischio** s.m. - foori.
- fisica** s.f. - fiisika, fiisikis.
- fisico** agg. - ku saabsan fiisikada; (*difetto f.*: iin jireed).
- fisiologia** s.f. - fisyloloji.
- fisionomia** s.f. - baxaalli ama qaabka wejiga.
- fissare** v.tr. - taagid, qoondayn; go'aamid, u qaba-sho (waqt).
- fissato** agg. - ku dhadhabay.
- fisso** agg. - taagan, go'an.
- fittizio** agg. - been, dhalanteed.
- fitto** agg. - jiq.
- fiume** s.m. - webi.

futare

futare v.tr. - ursasho, urin
futo s.m. - urin(ta).

fessibile agg. - laabmi kara.
flettere v.tr. - laabid, foodin.
flòra s.f. - dhir.

flòtta s.f. - koox maraakiib.
fluènte agg. - qulqula, shub-ma.

fluido agg. - dareere.

fluire v.intr. - qulqulid.

fluorescènte agg. - dhaldha-laala.

flusso s.m. - qulqul.

fluttuare v.intr. - sabbayn.

fobia s.f. - baqdin(ta), kah-sasho(da).

fòca s.f. - naasley badda ku nool.

fóce s.f. - biyoshub.

fódera s.f. - gal, foodero.

fòglia s.f. - caleen.

fogliame s.m. - wadajir calee-mo.

foglio s.m. - xaashi, warqad.

fogna s.f. - dhuun biyood wasakhda qaaddo.

fognatura s.f. - dhuumaha magaalada ee wasakhda qaada.

folclòre s.m. - cilmiga hiddaha, chaganka iyo fanka ee ummad.

folla s.f. - dad badan, xayn.

fòlle agg. - waalan.

follia s.f. - waalli.

fòlto agg. - jig ah, cumur ah.

